SOMALISKA

# Si wada jir ah waxaan u horumarin karnaa amniga xaafadaada



# Ma jeclaan lahayd inaad horumariso amniga xaafaddaada?

## *Noqo qofka lala soo xiriiro oo la shaqee ilaalada xaafadda!*

Sidii qofka lala soo xiriiro, waxaad ka qeyb qaadaneysaa horumarinta aagga la degenyahay. Si waa jir mulkiilayaasha dhismayaasha, booliska, degmadda iyo kuwa kale ee ka shaqeeya aaggaaga, waxaad caawinayaa inaad abuurto xaalado yareeya dembiga oo horumariyaan amniga.

### Waa maxay ilaalada xaafaddu?

Ilaalada xaafaddu waxay ku sabasantahay barashadda jaarkaaga iyo la shaqeynta, oo waxaa ka mid ah, mulkiilayaasha dhismayaasha, booliska iyo degmadda, isku dayga wax lagaga qabanayo dembiga badbaado la'aanta xaafadda. Si wada jir ah, dadku way is caawin karaan inay ilaaliyaan mid kastaba gurigiisa iyo aagga ka wada dhexeeya sida aaggaga albaabada, meelaha ciyaaraha iyo geerashka/meelaha gawaarida la dhigto.

### Faa'iidooyinka ilaalada xaafadda

Ilaalo xaafad si wanaagsan u abaabulan waxay

- yareyn kartaa dembiga aaggaaga la degenyahay
- waxay dhiiro gelineysaa ka qeyb qaadashada iyo bulshooyinka dhow
- waxay keenaan amni weyn iyo fayo qabka kuwan ku nool oo ka shaqeeya aagga
- Kordhiya aaminaada u dhexaysa dadka degen iyo kooxaha kale ee daneynaya.

Daraasadaha Sweden ee mashruucyada ilaalada xaafadda ee dabaqyada waxay muujiyeen in dembiyada maalin kasta ah ay yaraadeen ugu dhowaan saddex meelood hal meel iyaddoo ay sababtay hawlaha mashruucu.


### Shaqadaada sidii qof lala soo xiriirayo

Sii qof lala xiriiro shaqadaadu waa  muhiim, caawinta si loo hubiyo ilaalada xaafada ee aaggaagu way shaqaysaa. Waxay ku lug leedahay waxyaabaha soo socda:

- helitaanka iyo u gudbinta tilmaamaha iyo faallocelinta u dhexaysa jaararka iyo qofka ugu muhiimsan ee lala soo xiriiayo.
- u qaadista macluumaadka ku saabsan ilaalada xaafada dadka degen, ay ka mid tahay dadka hadda ka hor u soo guuray aagga.
- ka masuul ahaanta dhowr hawlood oo wax qabasho sida dhigista tiirka calaamada jidka iyo u dhiibista warqadda lagu dhejiyo daaqada/albaabka.
- ka qayb galka kooraska tababarka ilaalada xaafada waxaana dheer waxyaabo kale sida jabsiga guryaha iyo dembiyada kale looga hortaggi karayo.
- abuurida u heelanaanta ilaalada xaafada aaggaaga.

Gudah dhismayaasha qaybaha dabaqyada badan, wa fikrad fiican in lagu yeesho hal ama labba isuduwe dabaqiiba. Sidii, qofka lala soo xiriiro, dabaqyada jaranjaradaada waxay noqoneysaa masuuliyadaada ugu weyn. Qayb kastoo isku dabaq ah waxay qabsan kartaa waxa loogu yeero kullanka  dabaqa, halkaas oo aad kula kullanto  dadka kale ee degen si looga hadlo amniga iyo fayo qabka.

Waxaad caawin kartaa inaad abuurto fikrad habboon iyo u heelanaanta jaarka. Tan macnaheedu maaha inaad abaabusho dhacdooyinka ka hortagga dembiga, shayga muhiimka waa inaad wax wada qabataan si aad u xoojiso dareen wanaagsanee bulsho gudaha aaggaaga.



## Taageerada sidii qof lala xiriirayo

Sidii qof lala xiriirayo waxaa ku tageeri doonta dadka ka socda dhow urur. Waxaad filan kartaa inaad hesho taageero iyo macluumaad ka yimid xubnaha mshruuca, iyo siiba, ka yimid qofka muhiimka ah ee lala xiriirayo.

Qofka lala xiriirayaa ee aaggaagu sidoo kale waxa uu la kulmaa qofka muhiimka ah ee lala xiriirayo ama kuwa kale ee qaybta ka ah mashruuca ilaalilada si looga hadlo arrimaha guud.

## Ururka:

*Kooxda iskaashiga*


Kooxda iskaashigu waxay ka masuul tahay xeerka, ilaha, shaqada ka warheynta ah iyo sida shaqadu u horumarayso. Kooxdu waxay ka koobantahay mulkiilayaasha dhismaha, ururka dadka deegaanka ah, booliska, degmadda iyo kuwa kale.


*Qofka muhiimka ah ee lala xiriirayo iyo kooxda iskuduwida maxaliga ah*

Qofka muhiimka ah ee lala xiriirayo waxa uu masuul ka yahay iskuduwida iyo abaabulida shaqada hubinta in la hirgeliyay. Qofku sidoo kale waxa uu qaada macluumaadka u dhexeeya kooxaha iskaashanaya. Waxaa jiri kara kooxda isku duwida maxaliga ah oo qorsheyneysa oo fulisa hawlaha qofka muhiimka ah ee xiriirka.

*Dadka lala soo xiriirayo*

Dadka lala soo xiriirayo waxay qaadaan macluumaadka u dhexeeya qofka muhiimka ah ee la soo xiriirayo iyo dadka degen ee ku nool isla dabaq. Hal ama labba qof oo muhiim ah oo lala xiriiro dabaqiiba way habboontahay.





# *Wax badan oo ku saabsan Ilaalada Xaafadda*

### Brottsförebyggande rådet (Brå) – ( Gollaha Qaranka ee Ka hortagga Dembiga)

Qoraalkan waxa uu ku salaysanyahay *Grannsamverkan i flerfamiljshus – en guide* (Hagaha Ilaalada Xaafadda ee fooqa dabaqyada badan ah) Bogga internatka Bra waxaad ka akhriyi kartaa wax badan oo ku saabsan sida aad ula shaqeyn kartid ilaalada xaafada ee dabaqyada dhismaha, hel macluumaad ku saabsan mashruucyada ilaalada xaafadda deegaanka oo sii qoto dheeree fahankaaga waxa ay cilmi baaridu muujiso.

www.bra.se/grannsamverkan

### Iskaashiga ku lidka ah dembiga

Sidii heerka qaranka, ururka *Samverkan mot brott* (skaashiga dembiga ku lidka ah) waxa uu ku shaqeeyaa fikrada ilaallada xaafada iyagoo fidinaya aqoon, tilmaamaha horumarinta guud siiba tababarka iyo agabka macluumaadka.

Samverkan mot brott
Grannsamverkan

Ururku ka  kooban Samverkan mot brott waxaa ka mid ah booliska, Brå, Sveriges Kommuner och Landsting (SKL) iyo SSF ( hore u ahayd  Stöldskyddsföreningen) siiba shirkaddaha caymiska, mulkiilayaasha dhismaha iyo ururada guriyeynta.
www.samverkanmotbrott.se

### Ma jeclaan lahayd inaad ahaato qofka la xiriirayo?

La xiriir qofka ka masuulka ah ilaalada xaafadda aaggaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

*Skriv in era kontaktuppgifter här.*
*Lägg in er logotyp under era kontaktuppgifter eller till höger genom att lägga till bild.*

© Brottsförebyggande rådet 2016, Form: Ordförrådet AB och AB Typoform, Illustratör: Anna Gunneström